# Waa lay xidhay -
# maxaa dhacaya hadda?

Waxaa ku xidhay booliska ayadoo la raacayo Sharciga Ajaanibta qaybtiisa 36 (Udlændingeloven). Waxaad xaq u leedahay qareen muddada xabsigaaga. Qareenkaaga kaligii ayaa masuul ka ah xuquuqdaada.

Shaki kuma jiri doono su'aalo dhawr ah ood jeclaan lahayd in laga jawaabo, taasoo ay sababtu tahay dhawr qareen oo khibrad leh ayaa soo saaray qoraalkan, kaasoo sharaxaya waxa qareenkaagu kuu qabanayo marka lagu xidho ayadoo la raacayo Sharciga Ajaanibta qaybtiisa 36 (Udlændingeloven).

**Xidhidda**

Xilliga xidhidaada, boolisku waxuu ku siin doonaa sharaxaad gaaban oo ku saabsan sababta laguu xidhay. Sidoo kale boolisku waxuu kuu sheegi doonaa xuquuqdaada inaad la xidhiidho safaaradda ama qunsuliyadda wadankaaga. Haddii aad raadinayso magangalyo, waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad la xidhiidho Golaha Qaxootinga ee Dhaanishka (Danish Refugee Council). Wuxuu boolisku si aad kuugu sheegayaa in aad maxkamadda hor imaan doontid kama danbays 3 x 24 saacadood laga bilaabo xilliga lagu xidhay. Ka hor intaadan maxkamadda ka muuqan, garsooruhu wuxuu hubin doonaa in laguu qabtay qareen.

Muddada ka muuqashada maxkamadda, garsooruhu wuxuu go'aansan doonaa in lagu sii xidho, ama haddii lagu siidaynayo.

**Adeegsiga qareenkaaga**

Qareenkaagu wuuu kaa caawin karaa marka boolisku gacanta ku hayo kiiskaaga. Waxaa lagaa gacansiin karaa su'aalo badan oo muhiim ah, marka uu kiisku sacdo. Waa muhiim ogaanshaha waxa aad u adeegsan kartid qareenkaaga:

- Shaqada qareenka

Waa shaqada qareenka inuu qaado masuuliyadda xuquuqdaada muddada xabsigaaga, oy ka mid tahay xaqiijinta – caawintaada – in lagu xidhay wakhti gaaban.

- Kala hadalka kiiska xukuumadda

Waa maamulka laanta socdaalka, taasoo go'aansata in aad dagtid ama aad ka shaqaysid Denmark. Boolisku wuxuu fulin doonaa baadhista muhiimka ah ee kiiskaaga si loo maxkamadeeyo. Waa waajibaad ku saran inaad ka jawaabtid su'aalaha lagu waydiiyo, laakiin waxaad dalban kartaa qareen kula jooga mudda waraysiga. Adeegga Laanta Socdaalka ee Danish ka, Dacwad Oogidda Dadwaynaha iyo Amaanka Danish ka iyo Qaybta Xog Raadinta waxay is waydaarsan karaan xogta kugu saabsan haddii ay xidhiidh la leedahay kiiskaaga ama danaynta amaanka qaran.

- Waraysi qarsoodi ah

Qareenkaaga looma ogola inuu sheego waxa aad ku wada hadasheen, booliska ama qof kalaba. Si kale, waraysigaagu waa qarsoodi. Qareenkaaga wuxuu kali ah oo uu sheegi karaa qof kale waxa aad ku wada hadasheen adiga fasaxaaga. Haddii uu turjumaan joogo muddada kulankaaga qareenkaaga, turjumaanka sidoo kale looma ogola inuu u sheego qofna waxa aad sheegtay.

**Doorashada qareen**

Waad doorankartaa shakhsiyaddaada qofka aad rabtid inuu ku matalo. Haddii aad doonaysid inaad badashid qareenkaaga, waxaad u qori kartaa warqad qareenka inaad doonaysid inaad hesho cid ku matasha. Si ka badalan, waxaad u qori kartaa maxkamadda ama booliska. Waxaad waydiisan kartaa shaqaala maxbuuska inay kuu helaan ciwaanka saxda ah.

**Lacag siinta qareenkaaga**

Maxkamaddu waxay kuu qaban doontaa qareenkaaga, ayadoon la tixgalinaynin inaad adigu ama maxkamaddu waydiisatay qareen. Kharashka qareenka waxaa bixiya gobalka. Sidaa darteed ma bixin doontid matalaadda dhanka sharciga.

**Xuquuqda turjumaan**

Marka aad hortimaadid maxkamadda, ay ku waraysanayaan boolisku ama kulanka qareenkaaga, waxaad xaq u leedahay inaad heshid turjumaan. Waa muhiim in aad sheegtid isla markaasba haddii ay kaa haysato fahan darro turjumaanka ama dareemaysid wax uun taasoo turjumaado sababayso dhibaatooyin. Sidoo kale turjumaanka waxaa lacag siiya gobalka.

**Booqashooyinka iyo waraaqaha**

Waxaad xaq u leedahay inay kuu imaadaan booqdayaal, iyo waliba inaad dirtid ood heshid waraaqaha. Xaalado dhawr ah boolisku wuxuu go'aansan karaa in ayna kuu imaan booqdayaal dad gooni ah ama waxay amri in booqdayaashaada la ilaaleeyo. Go'aanadan waxaa la keeni karaa maxakamadda horteeda. Sidoo kale boolisku wuxuu baadhi karaa waraaqahaaga ka hor inta aadan helin ama aadan dirin, xaalado gooni ahna waa la hakin karaa waraaqdaada. Go'aan kasta oo booliska in la hakiyo waraaqdaada waa in si dhakhso ah loo hor keenaa maxkamadda.
Badanaa waxaad leedahay xuquuqda inaan lagaa ilaalin xidhiidhka qareenkaaga.

**Xabsiga – ugu badan 4 asbuuc markii**

Waxaa lagu xidhi karaa ugu badnaan afar asbuuc markii. Marka xilliga kama danbaysta ah dhamaado, garsooruhu wuxuu qiimayn doonaa in ay wali jiraan arrimo macquul xabsigaaga iyo in kale. Go'aanka waxaa lagu samayn dhagaysi maxkamadeed oo gaaban, muddadaas ood xaq u leedahay inaad joogtid. Hase yeeshee, sidoo kale dhagaysiga maxkamadda waa la fulin karaa sidaa darteed adiga iyo matalahaaga sharciga waxaad kula hadlaysaan garsooraha iyo dacwad oogaha caawinta dhalada layska arko.

Qareenkaagu wuxuu u doodi karaa una caban sii dayntaada. Dhanka kale, boolisku waa inuu keenaa sababo haddii ay rabaan in lagu sii xidho.

Garsooruhu wuxuu ogolyahay in laguu dheereeyo xabsiga ugu badnaan afar asbuuc markii. Xilligan ka dib, waa in markale garsooraha lagu hor keenaa, kaasoo go'aansan doona in ay tahay in lagu sii xidho iyo in kale. Ma kartid, sidaa darteed, ku talagal in lagu siidaayo ka dib muddo 4- asbuuc ah ay dhamaato. Waad samayn, hase yeeshe, waxaad xaq u leedahay garsooruhu inuu dhagaysto dacwadda dhamaadka 4-asbuuc muddada xabsiga.

Xabsigu waa inuuna aad uga badnayn oo caadi ahaan uuna ka badan 6 bilood.

Haddii Maxkamadda Dagmada ayna ku siidaynin, waxaad badanaa u wareejisan kartaa kiiskaaga Maxkamadda Sare, taasoo sidoo kale go'aansan karta haddii ay tahay in lagu siidaayo. Maxkamadda Sare

waxay ku samaysaa go'aankeeda qaab kiis qoran ah, taas waa in la sheego, suurtogal la'aanta adiga ama qareenkaagu iidna u awoodin inaad la hadashaan qareenka.

**Dheeraynta iskaa ah - ugu badnaan 2 ama 4 asbuuc**

Marka muddada xabsiga wakhtigiisu dhaco, waxaad kartaan, adiga iyo qareenkaagu, inaad go'aansataan in aad si iskaa ah u aqbali doontaan dheereynta xabsiga 2 ilaa 4 asbuuc markaas.

Tan waxaa sameeya qareenkaaga asagoo qoraal u gudbinaya maxkamadda oo ogolaanaya si iskii ah mudda kama danbaysta ah ee dheereynta. Tan waxaa loo la jeedaa ma ahan inaad adigu ka muuqato maxkamadda.

**Hor imaanshaha safaarad ama qunsiliyad**

Boolisku wuxuu go'aansan karaa in ay kula kulmiyaan safaaradda ama qunsuliyadda wadankaaga iyo in kale ama wax wadan kale ah oo cadaynaya aqoonsigaaga ama ku siiyay dukumiintiyada socdaalka. Haddii aad diidid la kulanka safaarad ama qunsuliyad, waxaad dalban kartaa in boolisku uu geeyo su'aasha maxkamadda horteeda, si ay u go'aansadaan in ay tahay inaad la kulantid iyo in kale.

**Ma shakisantahay?**

Badanaa suurto gal uma aha qareenkaaga inuu sheego si sax ah marka asaga ama ayada ku soo booqan karto. Sidaa darteed waxay noqon kartaa fikir wanaagsan inaad qortid su'aashaada, sidaa awgeed waxaad siin kartaa qareenkaaga marka danbe aad kulantaan.

Haddii aadan hubin ama shaki kaaga jiro wax kale oo ku jira kiiskaaga, badanaa waxaad xaq u leedahay inaad kala xidhiidho qareenkaaga.